



1 Abriil 2021

Macluumaadka talaalka COVID-19 ee loogu taloglay dadka qaba xaalado caafimaad ee leh khatarta sarreysa ee jirrooyinka ba'an

Bixinta talaalka ee federaalku way sii kordhaysaa. Tani macnaheedu waa dad badan oo reer Oregon ah ayaa u bilaabi kara qaadashada talaalka kahortagga COVID-19 si dhakhso badan, oo ay ku jiraan dadka qaba xaaladaha caafimaad. Dadka qaba xaaladahan waxay khatar badan ugu jiraan inay qaadaan fayraska–iyo dhimashada heerar sare. Dukumiintigan wuxuu sharraxaya goorta, meesha, iyo sida dadka ay ku qeexday Xarumaha Kahortagga iyo Xakamaynta Cudurka (CDC) lahaanshaha xaaladaha caafimaad ee u leh khatarta sare jirrooyinka ba'an in ay heli karaan talaalka.

GOORMA? Ugu dambayn Maarso 29, 2021 (da'ada dadka waaweyn 45-64); Ugu dambayn Abril 5, 2021 (da'da dadka waaweyn 16-44)

KUMA: Da'da dadka waaweyn 16–64 ee leh mid ama wax ka badan xaaladaha caafimaad ee ay qeexday CDC ee leh khatarta sarreysa ee jirroyinka ba'an

Gobolku wuxuu isticmaalaya qeexitaanka CDC ee xaaladaha caafimaad ee khatarta sarreysa ee jirrooyinka ba'an. Waxaan qiyaasaynaa in 800, 000 oo reer Oregon ah ay ku jiraan qaybtan. Da'da dadka waaweyn 16-64 ee aan ku jirin kooxihii hore waxay uqalmi doonaan taariikhaha kor ku xusan haddii ay leeyihiin mid ka mid ah xaaladahan soo socda:

- Kansarka
- Cudurka Kalida ee daba dheeraada
- Jirrooyinka ba'an ee sambabka, oo ay ku jiraan jirrooyinka oodmista hawo-mareenka (COPD), xiiqda (dhexe ilaa ba'an), jirrada gudaha sambabka, xystic fibrosis, iyo dhiigkarka sambabka.
- Asaasaqa ama xaaladaha kae ee neerfooyinka
- Sonkorowga (nooca 1 ama 2)
- Down Syndrome
- Xaaladaha wadnaha (sida hawlgabka wadnaha, cudurka xididka wadnaha ama cudurka wadnaha balaadhiya, ama dhiig-karka)
- Infekshanka HIV

- Xaaladda difaaca jirka hooseeya (habka difaaca jirka daciifka ah)
- Cudurka beerka
- Miisaan culus ama cayilnaan (ku qeexan qiyaasta cayilka jirka, ama BMI, ka badan 25 gm/ m²)
- Urka
- Cudurka sickle cell ama thalassemia
- Sigaar cabis, hadda ama beri horer
- Loo bedelay xubin jirka ah, ama unug dhiig raac ah
- Faalig ama jirro neerfaha lafdhabarka
- Xaaladda isticmaalka maandooriye

Wixii macluumaad dheeraad ah ee xaaladaha caafimaad ee ba'an ama khatar u lahaanshaha COVID-19, eeg: <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/need-extra-precautions/people-with-medical-conditions.html>

Halkee	Sidee
<ul style="list-style-type: none"> • Xarumaha Caafimaad ee La Aqoonsaday Federaal ahaan (FQHCs) • Isbitaalada • Munaasibadaha talaalka ee dadka badan • Hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanka • Farmasiyada • Rugaha caafimaadka ee socdaala • Dedaallada EMS 	<ul style="list-style-type: none"> • Booqo covidvaccine.oregon.gov si aad isu diiwaangaliso ogeysiisyada oo aad ugu xiranto talaalada. • Wac 211 ama 1-866-698-6155 • Ballanka toos ahaan uga qabso websaydyada farmasiga adoo booqanaya https://govstatus.egov.com/find-covid-19-vaccine

Jadwalka isku xiqxiga ee dhammaan dadka Oregon

Halkaan ayaad ka helaysaa xog sawir ah oo sharxaysa dadka u qalma talaalka COVID-19, iyo goorta.

Helitaanka dukumiintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. La xidhiidh Xarunta Macluumaadka Caafimaadka lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY or COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us